# Samtycke somaliska

## Oggolaanshaha in la ururiyo dhiigga xuddunta

Waxaan anigu/annagu helnay macluumaad af iyo qoraal ah oo ku saabsan Bangiga dhiigga xuddunta Qaranka ee lagu ururiyo dhiigga ku hadhay madheerta iyo xuddunta ka dib dhalashada ilmahayga. Waxaan anigu/annagu ognahay in ku deeqista dhiigga ku hadhaya madheerta iyo xudduntu ka dib dhalashada ilmahaygu ay tahay ikhtiyaari, oo aan odhan karno maya iyadoo sinaba u saamaynayn daryeelka la siiyo aniga iyo ilmahayaga. Anigu/Annagu waxaanu sidoo kale la socdaa in aanan ka noqon karin ka dib marka dhiigga lagu deeqo, iyo in dhiigga lagu deeqay lagu kaydin doono Bangiga Dhiigga Xuddunta si loogu adeegsado dadka u baahan in lagu beero/lagu talaalo dhiigga xuddunta.

Aniga/annagu waxaannu helnay macluumaad ku saabsan in dhiigga xuddunta la qaadayo 1 minit ka dib qalliinka dhalmada. Waxaa aniga/annaga sidoo kale nalagu wargeliyay in aanay ilmahayga wax khatar ah oo la garanaayo/la og yahay oo la xidhiidha ku deeqista dhiigga xudduntu aanay u laheyn, waxaananu helnay fursadda aannu ku weydiinno su'aalaha ku saabsan ku deeqidda.

Waxa kaydinta dhiigga la ururiyay khuseeya Xeerka tayada iyo heerka amaanka ee marka la maareynaayo nudaha iyo unugyada aadanaha, sharciyada Socialstyrelsen ee hawlaha nudaha qaabilsan iyo sidoo kale Xeerarka Biobank-ka. Sida waafaqsan sharciyada daryeelka caafimaadka qaranka waxa jira sir haynta natiijada tijaabada iyo xogta bukaanka. Wixii sir haynta ee macluumaadka shakhsiga khuseeya waxa loo maaraynayaa  sida waafaqsan sharciga ilaalinta macluumaadka (GDPR). Waxaan anigu/annagu ognahay in aannu heli karno heli karno macluumaadka ku jira diiwaanka Bangiga Dhiigga Xuddunta ee qaranka ee aniga iyo ilmaheyga/carruurteyda ku saabsan.

Aniga/annaga waxa sidoo kale nalagu wargaliyay in haddii mid ka mid ah baadhitaannada  lagu sameeyay dhiigga ilmaha ama hooyadu noqdaan kuwa aan caadi ahayn, aniga/annaga waa nala ogeysiin doonaa arrintan. Waa loo baahan doonaa in hooyada sambal laga qaado, kollayba waa dhici karta raaxo darro xilliga la qaadayo sambalka iyo weliba nabarka yar ee irbadeed.

Waxaan anigu/annagu halkan oggolaanshahayga/oggolaanshahayaga ku siinaynaa

- in aannu Bangiga Dhiigga Xuddunta Qaranka ugu deeqno dhiigga ku hadha madheerta iyo xuddunta ka dib marka ilmahayagu soo dhasho iyo in dhiigga ilmaha lagu kaydin karo bangiga iyo raadraacista u dhaxaysa ilmaha, hooyada iyo dhiigga lagu deeqay weligeed ay jiri doonto.
- in sambal dhiig laga qaado hooyada si looga baadho xanuunnada la is-qaadsiiyo iyo si loo go'aamiyo nooca nudaha (HLA), iyo in sambalka hooyada iyo ka ilmaha loo kaydiyo iyadoo la raacayo Xeerka Biobank-ka ee wixii baadhitaannada mustaqbalka ah.
- in aannu bixinno Caddeyn Caafimaad
- in diiwaannada caafimaad ee hooyada iyo ilmaha la baadho ilaa heerka lama-huraanka u ah si loogu qiimeeyo dhiigga laga soo ururiyey xuddunta ku habboon yahay in la barafeeyo oo loo isticmaalo ku beeritaan qof kale.
- in diiwaanka ilmaha la baadhi karo marka Bangiga Dhiigga Xuddunta la soo weydiisto in qof bukaan ah dhiigga loo isticmaalo. Taasi waa si loo hubiyo in ilmaha ay ku dhaceen xanuunno xunxun oo dhibaato ku keeni kara qofka bukaanka ah.
- in macluumaadka shakhsi ee ku saabsan ilmaha iyo qoyska ilmuhu ay ahaadaan kuwa qarsoodi ah oo kaliya ay heli karaan inay dib u eegaan shaqaalaha Bankiga Dhiigga Xuddunta sida waafaqsan sharci dejinta Iswiidhishka ee khuseeya.
- in haddii dhiigga lagu deeqay loo diiwaangaliyo in loo isticmaalo ku beeris qof kale ay macluumaadka ku saabsan ku habboonaanta dhiigga ee ku deeqista lala wadaago diiwaannada qaranka iyo kuwa caalami iyo dadka kale ee ku habboon ee la xidhiidha beeritaankan dhiigga ee la qorsheeyay.
- in macluumaadka lagu soo gudbiyay ogolaanshahan iyo soo aruurinta la diiwaan geliyo lagu keydiyo nidaamka macluumaadka shaybaadhka ee Bangiga Dhiigga Xuddunta.

☐ HAA ☐ MAYA

Anigu/annagu waxaanu sidoo kale halkan ku oggolaanaynaa

- in dhiigga, haddii aanu ku habooneyn in lagu keydiyo Bangiga Dhiigga Xuddunta Qaranka, loo isticmaalo hubinta tayada iyo cilmi-baadhis iyo in sidoo kale ay oggolaato Guddida Goboleed ee Anshaxu. Taasi waxay kaliya khuseysaa cilmi-baadhista iyadoo dhammaan macluumaadka suurogalka ka dhigaya in dib loo raadraaci karo cidda dhiigga laga qaaday laga masaxo.

☐ HAA ☐ MAYA

# Samtycke somaliska

Göteborg, taariikhda / *Göteborg den:*____________________________________________________________

Saxeexa masuulka / *Vårdnadshavarens namnteckning*:

__________________________________________________________

Magaca iyo lambarka shakhsi masuulka / *Vårdnadshavarens namn och personnummer*:

__________________________________________________________

Saxeexa masuulka/ *Vårdnadshavarens namnteckning*:

__________________________________________________________

Magaca iyo lambarka shakhsi masuulka / *Vårdnadshavarens namn och personnummer*:

__________________________________________________________

Saxeexa iyo magaca shaqaalaha jooga Bangiga Dhiigga Xuddunta Qaranka ee oggolaanshaha qabtay /
*Namnteckning och namn på personal vid Nationella Navelsträngsblodbanken som mottagit samtycket*:

______________________________________________________________________________________________________